

Haddii aad tahay qof ey carruur u dhigtaan dugsiyada hoose dhexe ee Norrköping

2020-05-07

Warbixin ku socota waalidka/ qofka leh masuuliyadda sharciiyeed ee ilmaha

Salaan,

Cudurka Korona iyo waxyeelladiisa waxey si xooggan saameyn ku reebeen shaqada dugsiyeenna hoose dhexe iyo dugsiya xilli firaaqaha muddo laba bil hadda ah. Culeyska dhinaca shaqada iyo kan saaran shaqaalaha wuxuu ahaa mid sare waxaana u shaqeyneynay qaab si fudud loo bedbedeli karo annagoo waqti yar gudihis xaaladeyna waafajineyna talooyinka iyo habraaca Hey'adaha. Laakiin waxaan ku faani karnaa in dugsiyada hoose dhexe ee Norrköping ey muddadaan gudaheeda xattaa ku guuleysteen iney xoogga saareen waxbarasho tayadeeda sarreyso. Taasna waxaa horseed u ahaa taageerada aan idinka helnay haddii aad tihiiin waalidiinta.

Isbedelka ku saabsan sida aan uga falcelinno marka aan isku aragno calaamado xanuun oo yaryar, in aad carruurtiinna guriga ku heysaan marka loo baahdo, in aad fahansantihiin in carruurtiinna maalmaha qaar ama xisadaha qaar ey wax u dhigaan macallimiin shaqeyya bedelka macallimiintooda caadiga ah, in waxbarashada dib u habeyn lagu sameeyay iyo in aad dhiirri gelineysaan shaqaalaha in shaqadooda tahay mid aad muhiim u ah.

Hadda waxaa yimid kuleelka xilliga guga weyna fududahay in loo maleeyo iney wixii jiray na dhaafeen, laakiin waan la soconnaa in halkan ey wali xaaladdu tahay mid khatar ah isla markaana in Hey'adda caafimaadka dadka eysan wali khafiifin talooyinka ey dhiibtay. Waxaan rajeyneynaa in aad sii wadaan fahanka aad fahansantihiin xaaladeyna isla markaana aan si wanaagsan ugu wada shaqeyno in aan gacan ka geysanno yarenta faafidda cudurka iyo in aan muujinno tixgelin dheeraad ah.

Talo ahaan waxaan rabnaa in aan idiin sheegno in uu jiro bog internet oo khaas ah oo loogu tala galay dhallinyarada iyo carruurta kuna jira norrkoping.se. halkaas waxaan isku hal meel ku uruurinnay warbixin ku saabsan caabuqa, si ey u fududaato in la helo. Halkaas waxaa ku ku jira xog qoraalkeedu fududyahay oo caabuqa ku saabsan iyo talooyin ku saabsan sida uu qofka isaga taxaddaro iskuna ilaaliyo haddii uu qofka guriga u joogo sababo la xiriira calaamado cudur oo fudu, laakiin sidaas ey tahayna isku taxalujinaya in uu waxbarashada la socdo. Halkaas waxaa ku jira macluumaad lagala xiriiro shaqaale yaqaanna caafimaadka ardayga, oo lala xiriiri karo haddii uu qofku welwel ka qabo caabuqa ama xaaladda cusub ee jirta. Wey fiicantahay haddii aad u sheegtid carruurtaada boggan, ama si wada jir ah u booqda: norrkoping.se/corona-information-till-unga

Mahadsanid!

Salaan diirran

Jenny Östlund, madaxa dugsiyada hoose dhexe

Mikael Hultberg, madaxa dugsiyada hoose dhexe

Claes Göransson, ku sime madaxa dugsiyada hoose dhexe

Sofie Lindén, Maamulaha waxbarashada